



# Personal Account Opening Form (Somali)



Annaga oo ah dadka saxiixay form-kan, waxaan idinka codsanaynaa in aad noo furtaan xisaabta faahfaahinteedu tahay sida soo socota. Waxaan halkan ku caddaynaynaa in aan aqrinay, fahamnay, aqbalnay una hogaansamayno shuruudda furista iyo adeegsiga akoonka ee MyBank Limited.

## Qaybta 1aad: Nooca xisaabta & faahfaahinta shaqsiga:

Fadlan saar calaamadda “✓” meesha ku habboon:

Nooca xisaabta	Fadlan saar “✓”
Xisaab-socoto shaqsi ah	
Xisaab-socoto arday	
Xisaab wadaag ah (Dad wada leeyihiin)	
Xisaabta dadka VIP ga ah	
Xisaabta Kaydka	

Nooca lacagta ee akoonka	Fadlan saar “✓”
Shilin Soomali	
USD	
EUR	
GBP	
Nooc kale (Fadlan faahfaahi) _____	

Adeegyo dheeri ah	Fadlan Saar “✓”
Ma kuu daabacnaa jeeg?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Makuu furnaa adeegga Internet banking?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Ma kuu daabacnaa Kaar ATM?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

Faahfaahinta codsada 1aad:	
Magaca oo buuxa	
Id/passport no.	
Dhalashada	
Ma leedahay dhalasho 2aad? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor dalka aad ka haysato dhalashada 2aad iyo id number-kaaga	
Cinwaankaaga oo buuxa	
Ma leedahay degenaansho dal aan ahayn midka aad ciwnaaka ku xustay? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor faahfaahinta	
Taleefan number	
Email address	
Shaqadaada/waxa aad ka shaqayso/ cidda aad u shaqayso	
Maka mid tahay saxiixayaasha akoonka?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Whatsapp no. /Facebook, Twitter address	

Cidda bankigu la xiriiri karo haddii adiga lagu waayo (next of kin)?	Magaca:
	Cinwaanka:
	Tel.
	E-mail:
Qiyaasta dakhliga ku soo gala bishii	<input type="checkbox"/> 0-10,000 <input type="checkbox"/> 10,001-50,000 <input type="checkbox"/> 50,001-100,000 <input type="checkbox"/> Above 100,000

### Faahfaahinta codsadaha 2aad (keliya xisaabaha la wada leeyahay):

Magaca oo buuxa	
Id/passport no.	
Dhalashada	
Ma leedahay dhalasho 2aad? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor dalka aad ka haysato dhalashada 2aad iyo id number-kaaga	
Cinwaankaaga oo buuxa	
Ma leedahay degenaansho dal aan ahayn midka aad ciwnaaka ku xustay? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor faahfaahinta	
Taleefan number	
Email address	
Shaqadaada/waxa aad ka shaqayso/ cidda aad u shaqayso	
Maka mid tahay saxiixayaasha akoonka?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Whatsapp no. /Facebook, twitter address	
Cidda bankigu la xiriiri karo haddii adiga lagu waayo (next of kin)?	Magaca:
	Cinwaanka:
	Tel.
	E-mail:
Qiyaasta dakhliga ku soo gala bishii	<input type="checkbox"/> 0-10,000 <input type="checkbox"/> 10,001-50,000 <input type="checkbox"/> 50,001-100,000 <input type="checkbox"/> Above 100,000

### Faahfaahinta codsadaha 3aad (keliya xisaabaha la wada leeyahay):

Magaca oo buuxa	
Id/passport no.	
Dhalashada	
Ma leedahay dhalasho 2aad? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor dalka aad ka haysato dhalashada 2aad iyo id number-kaaga	
Cinwaankaaga oo buuxa	



Ma leedahay degenaansho dal aan ahayn midka aad ciwnaaka ku xustay? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor faahfaahinta	
Taleefan number	
Email address	
Shaqadaada/waxa aad ka shaqayso/ cidda aad u shaqayso	
Maka mid tahay saxiixayaasha akoonka?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Whatsapp no. /Facebook, twitter address	
Cidda bankigu la xiriiri karo haddii adiga lagu waayo (next of kin)?	Magaca:
	Cinwaanka:
	Tel.
	E-mail:
Qiyaasta dakhliga ku soo gala bishii	<input type="checkbox"/> 0-10,000 <input type="checkbox"/> 10,001-50,000 <input type="checkbox"/> 50,001-100,000 <input type="checkbox"/> Above 100,000

<b>Faahfaahinta codsadaaha 4aad (keliya xisaabaha la wada leeyahay):</b>	
Magaca oo buuxa	
Id/passport no.	
Dhalashada	
Ma leedahay dhalasho 2aad? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor dalka aad ka haysato dhalashada 2aad iyo id number-kaaga	
Cinwaankaaga oo buuxa	
Ma leedahay degenaansho dal aan ahayn midka aad ciwnaaka ku xustay? Haddii jawaabtu tahay “haa” fadlan qor faahfaahinta	
Taleefan number	
Email address	
Shaqadaada/waxa aad ka shaqayso/ cidda aad u shaqayso	
Maka mid tahay saxiixayaasha akoonka?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Whatsapp no. /Facebook, twitter address	
Cidda bankigu la xiriiri karo haddii adiga lagu waayo (next of kin)?	Magaca:
	Cinwaanka:
	Tel.
	E-mail:
Qiyaasta dakhliga ku soo gala bishii	<input type="checkbox"/> 0-10,000 <input type="checkbox"/> 10,001-50,000 <input type="checkbox"/> 50,001-100,000 <input type="checkbox"/> Above 100,000



## Qaybta 2aad: Xisaabaha kale ee macmiilku leeyahay:

Ma leedahay akoon kale?  Haa  Maya Haddii jawaabtu tahay “Haa”, Fadlan qor faahfaahinta:

Lambarka akoonka	Bankiga	Laanta

## Qaybta 3aad: Habka akoonka loo saxiixayo/lacag looga saarayo:

Keli-keli ayaan uga saari karaa  Waa in ay dhammaantood wada saxiixaan  Labo kasta oo ka mid ah saxiixayaasha ayaa ka saari kara  Si kale ayaa akoonka lacag looga saari karaa (Fadlan faahfaahi).

\_\_\_\_\_

## Qaybta 4aad: SMS banking & ogeysiisyada:

Bankigu waa u fasaxanyahay in uu mobile-kayga/keenna number-kilsu yahay: \_\_\_\_\_

ee ku qoran magaca: \_\_\_\_\_

iigu/noogu soo diro SMS si uu noogu soo wargeliyo dhaqdhaqaaqyada xisaabtayda/teenna.

## Wadaagista ogeysiisyada iyo xogta kale:

Bankigu waxa uu mar kasta u fasaxanyaahy in uu mobile kayga/keen na No. \_\_\_\_\_

kuna qoran: \_\_\_\_\_

iigu/noogu soo diro dhamaan xogta xisaabtayda/teenna bankiga, iyo ogeysiisyada bankigu bixinayo. Sidoo kale bankigu waxa uu xogtaas iigu soo diri karaa e-mailkayga/keenna cinwaankiisu yahay:

\_\_\_\_\_. aniga/annaga ayaana qaadanaya/qaadanayna mas'uuliyadda xogta lagu soo diro mobile-kayga/keenna ama e-mailkayga/keenna sare ku xusan iyada oo bankigu u tixgelin karo xogta naloogu soo diro mobile-kaas ama e-mailkaasi in ay nasoo gaartay.



## Caddayn:

Waxa aan halkan ku caddaynaynaa in xogta aan bankiga ku siiyay/siinnay form-kan ay tahay run.

Magaca	Id/passport no.	Suul-saarka	Saxiixa

## Qaybtan bankiga ayaa isticmaalaya:

Lambarka akoonka \_\_\_\_\_ Nooca akoonka \_\_\_\_\_

Waxyaalaha la hubiyay markii akoonka la furayay:	Fadlan saar "✓"
Documents-ka orginal ka waa la arkay	
Macmiilka waa laga qaaday saxiix	
System ka waa lagu diyaaariyay in SMS loo diro macmiilka	
ID-ga macmiilka iyo documents-ka kale ee aqoonsiga (KYC documents) waa la koobiyeeyay	
Daabacid chequebook waa loo amray macmiilka	
Daabacidda ATM card waa loo amray macmiilka	
Macmiilka waa laga saxiixay shuruudaha adeegsiga bankiga	
Form-ka akoon-furashada si buuxda ayaa macmiilka looga buuxiyay/saxiixay	
Sawirka saxiixayaasha waa la geliyay system-ka	
Saxiixa macmiilka waa la geliyay system-ka	
Macmiilka waa lagu daray saaxiibbada bankiga ee baraha bulshada	
Macmiilka waa loo sameeyay qof uu bankiga kala soo xiriiri karo	
Suul-saar waa laga qaaday macmiilka	

## Form-kan waxaa hortiisa lagu buuxiyay/saxiixay:

Magaca	Code	Saxiix
Taariikh:		

## Waxaa codsiga akoon-furista guddoomay isla markaana system-ka geliyay:

Magaca	Taariikhda	Saxiixa
Taariikh:		

## Waxaa xaqiijiyay deedna ansixiyay:

Magaca	Taariikhda	Saxiixa
Taariikh:		

Waxaan halkan ku caddaynayaa in aan hubiyay in xogta macmiilka lagu buuxiyay form-kan si waafaqsan hab-raacyada aqoonsiga macmiilka (KYC) iyo in sidoo kale in macmiilka laga qaaday documents-kii KYC-ga laguna lifaaqay file-kan. Waxaan sidoo kale ansixiyay in macmiilkani ku soo biiro mcaamiisha MyBank LTD.

Maamulaha laanta: \_\_\_\_\_ Saxiixa \_\_\_\_\_

## Shuruudaha adeegsiga bankiga:

Hoos waxaa ku taxan shuruudaha adeegsiga MyBank LTD kuwaas oo ay ku salaysanyihiin adeegyada aan ku siinayno. Qoraalkan dhexdiisa, "macmiil" waxaa loola jeedaa macmiilka MyBank LTD, "Bankiga" waxaa loola jeedaa MyBank LTD, halka "Waddanka ama dalka" loola jeedo Soomaaliya. Xagga hoose oo aad saxiixdo waxaa micnaheedu yahay in aad aqrisay, fahamtay isla markaana aad aqbashay shuruudaha adeegsiga bankiga.

- Lacagta macmiilku dhiganayo bankigu waa amaah aan faa'iido lahayn (Haddii aan lagu heshiin maalgashi sharcigu ogolyahay). Bankigu ma siin doono kamana dalban doono macmiilka wax faa'iido ah oo la xiriira haraaga togan (credit) ama taban (Debit) ee xisaabtiisa kaydka ama midda socota. Bankigu waxa uu siin doonaa macmiilka lacagtiisa oo dhamaystiran ama qaar (Hadba sida macmiilku dalbado) mar allaale marka uu soo dalbado lacagtiisa iyada oo aan lagu samayn wax daahin ah.
- Macmiilku waxa uu aqbalay in uu u hogaansanyahay shuruudca, qawaaniinta, amarrada fulinta iyo tilmaamayaasha kale ee ka soo baxa hay'adaha awoodda u leh soo saarista qawaaniintaas, amarradaas ama tilmaamayaasha ee dalka Soomaaliya.
- Macmiilku waxa uu halkan ku caddaynayaa in lacagaha maraya akoonkiisa lagu kasbaday isla markaana loo adeegsan doono keliya siyaalo ama habab sharciga dalku ogolyahay.
- Macmiilku waxa uu ogolaaday in lambarkiisa taleefanka, e-mailkiisa iyo whatsapp number-kiisa uga diiwaan gashan bankigu yihiin qayb ka mid ah walxaha macmiilka lagu aqoonsado (ID) sidaas darteedna bankigu waxa uu macmiilka Ugu soo diri karaa ama kaga guddoomi karaa (Cod ama qoraal) xanbaarsan macluumaadka macmiilka iyo amarrada macmiilka ee aan la xiriirin lacag bixinta iyada oo aan loo eegayn heerka qarsoodiga ee xogta. Xogtaas waxaa ka mid noqon kara lambar-sireedka card-ka, Ogeysiisyada bankiga iyo xog kasta oo bankigu doonayo in uu macmiilka gaarsiiyo. Bankigu waxa uu u aqoonsan karaa xog kasta oo lagu diro kannaalada sare ku xusan in ay gaartay macmiilka isla markaana waa ku dhaqaaqi karaa bankigu wixii tallaabo ah ee ogeysiintaas la xiriira.
- Iyada oo ku saleysan go'aankiisa gaarka ah, laakiin ogeysiis ku filan bixinaya, macaamiilka iyo bankiga labadaba waxa ay xiri karaan xisaabta bangiga ee macaamiilka wakhti kasta.
- Macaamiilku wuxuu ogolyahay in bangigu, ka dib ogeysiinta macaamiisha, uu wax ka beddeli karo khidmadaha (fees) uu ka qaado macaamiisha iyo shuruudaha adeegsiga bangiga waqti kasta.
- Macaamiilku wuxuu halkan ku ogolaanayaa in bangigu ka goosan karo xisaabtiisa wixii khidmad (fee) ku waajiba macmiilka, ama wixii deyn ah ee bankigu ku yeesho macmiilka. Haddii lacagta lagu yeeshay macmiilku aanay ku jirin xisaabtiisa xilliga lagu yeeshay, waxaa macmiilku fasaxay in lacagahaas laga jari karo akoonnada kale ee uu bankiga ku leeyahay.
- MyBank Limited wuxuu hirgalin doonaa nidaamyo banki (Banking systems) iyo hannaan (Processes) amnigoodu suganyahay, lana jaan-qaadayo hababka caalamiga ah ee bankiyada si looga ilaaliyo xogta iyo hantida macaamiisha dadka aan sharciga u lahayn iyo ku xadgudubka. Macaamiilku wuxuu xaq u leeyahay inuu bankiga weydiyo faahfaahin ku saabsan arrintan.

9. Saxiixa macmiilka ee u diiwaan-gashan bankigu waa midka lagu salaynayo dhamaan macaamilaadka banki ee macmiilka loogu qabto bankiga kadib codsigiisa. Isla saxiixaas ayaana shaqaynaya ilaa macmiilku bedelaayo ama kansalaayo. Bedel ama kansalaad kasta oo macmiilku ku sameeyo saxiixiisa waxa uu dhaqan-gal noqon doonaa maalinka shaqo ee ku xiga maalinta uu amarka bedelka ama kansalaadda soo gaarsiiyay laanta bankiga ee xisaabtiisu ka furantaahy.
10. Haddii macmiilku rabo in uu akoonkiisa wax ka bedelo, waa in uu codsi ku soo gudbistaa qoraal la soo gaarsiiyay saraakiisha bankiga ee loo igmaday arinkaas. Codsiyada lagu dalbanaayo isbeddellada noocan oo kale ah lama aqbali doono in lagu soo gudbiyo taleefan, Whatsapp ama hab kale oo electronic ah.
11. Bankigu waxa uu siin doonaa macaamiishiisa adeegyo digital/ electronic ah kuwaas oo macmiilka u sahlaya in uu transactions ku samayn karo hab online ah. Bankigu waxa uu xil maangal ah iska saari doonaa dhawrista amniga ee systems-ka online ka ah ee bankiga halka macmiilku uu yeelanayo masuuliyadda ilaalinta xogtiisa loo adeegsado hababka online ka ah iyo in uu si dhaqso ah bankiga hab qoraal ah ugu soo wargeliyo haddii xogtaasi baxdo ama ku dhacdo gacan kale.
12. Haddii wax uun dood ama khilaaf ahi dhex maraan milkiilayaasha xisaabta ku leh bankiga, bankigu waxa uu go'aan ku aaddan khilaafka ku qaadan karaa qodobada ku qoran hehsiiska macaamiisha wadaleh akoonka ee loo soo gudbiyay bankiga. Sidoo kale bankigu waxa uu dalban karaa in maxkamadi go'aan ka gaarto khilaafka.
13. Saxiixayaasha akoonka ama habka ay u saxiixaan (Keli-keli, wadajir IWM) waxaa keliya oo wax looga bedeli karaa hab qoraal ah oo ay soo saxiixeen saraakiisha shirkadda ee arinkaas awoodda u leh, si waafaqsan xeerka lagu aasaasay ee shirkadda ee kolkii akoonka la furayay loo soo gudbiyay bankiga ama mid wax laga badalay oo ay bankiga hab sharci ah ugu soo gudbiyeen saraakiisha shirkadda ee arinkaas awoodda u leh.
14. Bankigu waxa uu u fasaxanyahay in uu ka jaro akoonka macmiilka wax allaale wixii amar lacag bixin ah ee saxiixayaasha sharciga ah ee akoonku soo qoraan/saxiixaan xattaa haddii taasi sababayso in xisaabta macmiilku yeelato haraa taban (Debit balance). Macmiilka ayaana mar kasta xaq loogu leeyahay in uu iska bixiyo ama daboolo wixii haraa taban ah ee xisaabtiisa ku taagan.
15. Haddii aan bankigu xiilgii ku haboonaa ka goosan akoonka macmiilka khidmad ku waajibtay ama lacago kale oo lagu leeyahay, bankigu waxa uu u fasaxanyahay in uu lacagahaas ka goosto akoonka macmiilka xilli kasta oo mustaqbalka ah.
16. Macmiilku waa in uu si qoraal ah ku soo gaarsiiyaa bankiga haddii wax uun isbedel ah ku yimaadaan xogta uu horay bankiga u siiyay xilligii laga buuxinayay akoonka furashada xisaabta (Account opening form).
17. Macmiilku waxa uu bankiga u fasaxay in akoonkiisa laga saari karo lacag kasta oo si qalad ah ugu dhacda, lacagaas haku jirto akoonka ama yaanay ku jirin oo daruuri ha noqoto in akoonka macmiilka laga dhigo mid leh haraa taban (Debit balance).
18. Macmiilka ayaa masuul ka ah in uu ilaashado password-kiisa/keeda/kooda adeegga internet banking-ka, jeegagga iyo kaararka ATM-ka IWM. Haddii ay ka baxdo mamciilka mid ka mid ah xogaha sare ku xusan waa in uu si degdeg ah bankiga u soo wargeliyaa isaga oo kala xiriiraya Tel. No. +252 1 84 7777 ama 252 61 3737777 iyo e-mail: info@mybank.so . Bankigu masuul kama ahan wixii khasaaro ka dhasha xogaha sare ku xusan oo baxa isla markaana aan bankiga dhaqso loo soo wargelin ama asal ahaanba aan la soo wargelin.
19. MyBank LTD waxa uu mar kasta ku dadaali doonaa in systems-ka bankigu ahaadaan kuwo u shaqaynaya si wanaagsan, haddiise ay dhacdo in systems-ka bankiga cillado soo waajahaan, MyBank looma raacan doono wixii daahitaan adeeg ama sahlid-la'aan ah ee halkaas ka yimaada.
20. Qoraallada rasmiga ah ee macmiilku u soo dirayo bankigu waa in ay ku yimaadaan mid ka mid ah kanaallada soo socda: SMS Tel +252 61 3737777, e-mail: info@mybank.so, Farriin qoraal Whatsapp No. + 252 61 3737777 iyo weliba inta lagu gudo jiro saacadaha shaqada ee bankiga.
21. Bankigu waxa uu macaamiisha kaga aqbalaa deposit-ka hab cash ah ama hababka kale ee akoonnada lacagaha loo dhigo. Bankigu waxa uu aqbali karaa deposit kasta oo ku socda akoonka macmiilka iyada oo aan bankiga wax xil ah ka saarnayn lacagahaas ku dhacaya akoonka macmiilka iyo meesha ay ka yimaadeen.
22. Bankigu waxa uu u fasaxanyahay in uu baabi'iyo jeegagga iyo kaararka ATM-ka ee macmiilka loo daabacay (Labo ogeysiin oo qoraal ah kadib) haddii aanuu macmiilku bankiga uga qaadan muddo 6 bilood ah oo ka bilaabata maalintii la daabacay kaarka ama jeegga.
23. Bankigu waxa uu qaban karaa jeeggaga ku socda macmiilka ee ka soo baxa bankiyada kale si loo soo clear gareeyo, hase yeeshee, bankigu masuul kama aha soo caddaynta (Cash garaynta) jeegaggaas.
24. Bankigu waxa uu mararka qaar hakin karaa lacago ama haraa lacageed oo macmiilku leeyahay si loo sameeyo xaqiijin ama hubin.

Magaca macmiilka: \_\_\_\_\_ Saxiixa macmiilka: \_\_\_\_\_





**Nagala soo xariir**

7777 (For Local Calls) +252 1 847777 (For International Calls) 252 61 3737777 (For WhatsApp Chat)  
E-mail: [info@mybank.so](mailto:info@mybank.so) | [www.mybank.so](http://www.mybank.so)